# Lacagta khidmadda bukaanka

| | |
|---|---|
| **Baaritaan qaadis** | **0 kr** |
| **Booqo xarun caafimaad iyo isbitaal** | **200 kr** |
| **Booqasho xarunta xaaladaha degdegga ah** | **400 kr** |

- Uma baahnid in aad lacag dhiibto haddii aad ka yartahay 20 sano ama haddii aad buuxiso 85 sano.
- Waxaad bixineysaa isla qiimaha booqashada la ballansado, xitaa haddii ay booqashada ku dhacdo qaab fogaan arag (chaatt, telefoon, ama muuqaallada layska waco).
- Booqashooyinka qaar waa lacag la'aan, tusaale ahaan raajada naasaha iyo booqashooyinka xarumaha caafimaadka ee hooyada iyo dhallaanka.

**Iska baaji booqashada haddii aadan imaan karin.**

Waxaad u baahantahay inaad baajiso booqashadaada ugu dambeyn 24 saacadood ka hor waqtiga aad ballansatay, haddii kale waxaa lagaa qaadayaa lacag khidmad ah oo dhan 400 karoon. Tani waxay xittaa khusaysaa booqashooyinka aan lacagta lagu qaadin.

**Xakamaynta kharashka badan iyo kaarka lacag-la'aanta.**

Waxaa jira xad go'an oo laguugu talagalay inta aad ku bixin karto booqashooyin muddo 12 bilood ah. Waxaa la dhahaa xakamaynta kharashka badan. Marka aad bixiso 1 450 oo karoon, dhammaan booqashooyinka waxay noqonayaan kuwo lacag la'aan ah ilaa 12 bilood laga joogo booqashadii ugu horreysay ee lacag lagaaga qaaday.

**Lacag dhiibid**

Kaar ayaad ku dhiibi kartaa adiga oo isla goobta jooga ama warqad lacag sheegasho ayaad ku dhiibi kartaa. Waxaa soo raacaya lacagta warqadda lacag sheegasgada oo 50 karoon ah, haddii aad lacagta ku bixineyso qaabkaas. Shirkadaha qaar waxay ku siinayaan fursad aad ku bixiso adoo adeegsanaya Swish.

**Waxyaabo dheeraad ah**

Lacagaha khidmadaha waxay dhaqan galayaan laga bilaabo 1-da bisha Janaayo ee sanadka 2026, waxayna khuseeyaan dadka ku diiwaan gashan Iswiidhan ama haysta kaarka EU.

*Haddii aad shaki ka qabto inta lacag ay booqashadaadu ku kacayso, waxaad ka akhrisan kartaa macluumaad dheeraad ah 1177.se/skane/avgifter-skane ama waxaad la hadli kartaa shaqaalaha caafimaadka.*

Warbixin dheeri ah ka akhriso
1177.se/skane/avgifter-skane

REGION SKÅNE